

**JAMHUURIYADDA
SOMALILAND**



**REPUBLIC OF
SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE**

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadkii 11aad

Cadad Gaar ah

*Tariikhda Daabacada
26/03/2022*

**XEERKA HAY'ADDA ABBAABUL-KA-SAARKA
IYO DIB-U-JIHAYNTA
(N.D.R.C)
XEER LR.48/2011**

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com**

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF.JSL/M/XM/249-451/042011 ✓

DATE10/04/11.....

XEER MADAXWEYNE No: 0126/042011

Dhaqan-galka Xeer Lr. 48/2011

Xeerka Hay'ada Abaabul Ka saarka iyo Dib u Jihaynta ee JSL (NDRC)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee Go'aan Lr. GW/KF-14/514/2011, ee Ansixinta Xeerka Hay'ada Abaabul Ka saarka iyo Dib u Jihaynta ee JSL.


Wuxuu Soo Saaray,

Dhaqan-galka Xeerka Hay'ada Abaabul Ka saarka iyo Dib u Jihaynta ee Jamhuuriyadda Somaliland (NDRC) ee Xeer Lr. 48/2011.

Allaa Mahad Leh,


Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland





Ref: CW/KF-14/514/2011

Date : 04/04/2011

GO'AAN ANSIXIN XEERKA HAY'ADA ABAABUL-KA SAARKA IYO DIB-U-JIHAYNTA

GOLAHA WAKIILADU:

MARKUU ARKAY: Qodobada 34aad (1aad), 38aad iyo 39aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

MARKUU ARKAY: Degreeto Lr: M/Xeer/249/54/1195 ee M/weynaha oo ku saabsanayd Abuuridda Hay'ada **NDRC**.

MARKUU ARKAY: Warqada Ogolaanshaha M/weynaha JSL ee nuxurkeedu yahay in hay'ada Abaabul-ka-saarka iyo Dib-u-jihaynta (**N.D.R.C**) ay a-haato hay'ad madax-bannaan.

MARKUU DERSAY: Warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha, Nabadgelyda iyo difaaca, kana dooday nuxurka uu Mashruucani xambaarsan yahay.

MARKUU KU QANCAY: Una codeeyey wax ka bedelka iyo soo jeedimihii Golaha Guuritidu ku soo sameeyeen mashruuc sharciga Xeerkan.


MARKUU TIXGELIYEEY: Hawlihii hore ee hub-ka-dhigista iyo abaabul-ka-saar ee ay hay'addu soo Qabatay.

MARKUU GARAWSADAY: In weli baahi loo qabo in ay dalka ka sii socdaan hawlihii hub ka-dhigista iyo abaabul-ka-saarku.


MARKUU U CODEEYAY: Xeerka Haya'adda Abbaabul-ka saarka iyo Dib-u Jihaynta (**N.D.R.C**), goobjoogna ahaayeen 55 Mudane

WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo dhan 50 Cod oo gacan taag ah ku ansixiyay Xeerka Haya'adda Abaabul-ka saarka iyo Dib-u Jihaynta (**N.D.R.C**), halka uu ka diiday 1 Mudane, kana aamuseen 3 Mudane Gudoomiyuhuna muu coddayn sida caadada ah.


C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Jsl

Allaa Mahad Leh


Jamaal Jaamac Xasan
Ku-simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Jsl

Golaha Wakiiladu

- Markuu arkay: - Qodobada 34aad (1aad), 38aad, 39aad ee Dastuurka
- Markuu Arkay: - Warqada ogolaanshaha M/weynaha JSL ee nuxurkeedu yahay in Hay'ada abaabul-ka-saarka iyo jilhaynta (N.D.R.C) ay a-haato hay'ad madax-banaan
- Markuu Darsey: Warbixinta Gudiga Arrimaha Gudaha, nabadgalyada iyo difaaca kana doodey nuxurka uu mashruucaasi xanbaarsanyahay
- Markuu u Codeeyay: waxka beddelkii iyo soojeedimihii Golaha Guurtidu ku soo sameeyey mashruuc sharciga xeerkan
- Markuu Tixgeliyay: Hawlihii hore ee Hub-ka-dhigista iyo abaabul-ka-saarka ee Hay'addu soo qabatay
- Markuu Garowsadey: In wali baahi loo qabo in ay wali dalka kasii socdaan hawlihii hub ka-dhigista iyo abaabul-ka-saarku

WUXUU ANSIXIYEEY XEERKAN:



Qodobka 1AAD

Qeexida Hay'ada Abaabul-ka-saarka iyo Dib-u jihataynta (N.D.R.C)

- Hay'ada Abaabul-ka-saarka Qaranka (N.D.R.C): waa Hay'adda Dawli ah, maamul ahaana Madax-banaan una xil saran dajinta iyo qorsheynta iyo waliba fulinta barnaamijyada ku aadan hub-ka-dhigista abaabul-ka-saarka iyo dib-u-jihataynta
- Abbaabul-ka-saar: waa hab raac loo kala diro dadka hubaysan ee u abaabulan hab -beeleed ee weli ku sugan Gobalada Dalka qaarkood, iyo in la dhimo tirade ciidamada eek ala duwan, agoomahooda, naafadooda, iyo hawl-gabkooda.

Qodobka 2AAD

Ujeeddada Hay'adda Abaabul-ka-saarka iyo Dib-u jihataynta (N.D.R.C)

Ujeedooyinka Hay'ada waxa kamid ah:

1. In ay dalka J.S.L gaadhsiiso Nabegalyo iyo Xasilooni taam ah oo waarta oo ku salaysan horumar iyo dhaqaale kobcin saamaysa dalkoo dhan, iyadoo u maraysa barnaamijyada hub ka-dhigista abaabul-ka-saarka iyo dib-u-jihataynta.
2. Inay barnaamijyada Jihataynta u dhacaan si cadaalad ah oo nabbed-gelyo ah, isla markaana wax dhisid ah oo ku salaysan horumarka bulshada iyo kor-u-qaadida isku kalsoonida umada.
3. Inay barnaamijyada hub ka-dhigista iyo dib-u-jihataynta ku dhinto tirada ciidamada kala duwan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 3AAD

Waajibaadka Hay'ada Abaabul-ka saarka iyo dib-u jihataynta (N.D.R.C)

1. Fulinta qorshaha Hawl-galka ee barnaamijyada hub-ka-dhigista, abaabul-ka-saarka, jihataynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabadgelyada J.S.L
2. Maamulka, kormeerka, xidhiidhinta, iyo qiimeynta dhamaan barnaamijyada hub-ka-dhigista, abbaabul-ka-saarka, jihataynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabad-gelyada Jamhuuriyadda Somaliland.
3. Xaqiijinta hab-sami-u-socodka barnaamijyada hub-ka-dhigista, abbaabul-ka-saarka, jihataynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabadgelyada jamhuuriyada somaaliland.
4. Ka caawinta dhinaca farsamada Guddi-hoosaadyada hub-ka-dhigista abaabul-ka-saarka, jihataynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabad-gelyada jamhuuriyada Somaliland.
5. Hay'adda abaabul-ka saarka Qaranku (N.D.R.C) waxay meel marinaysaa jihataynta xubnaha ciidamadda jamhuuriyada Somaliland ee la dhimayo.
6. Tallo siinta wasaaradaha iyo Hay'addaha ku hawl-lan barnaamijyada hub-ka-dhigista, abbaabul-ka-saarka jihataynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabad-gelyada jamhuuriyada Somaliland.

QODOBKA 4AAD

Adeegga Hay'adda Abbaabul-ka-saarka iyo Dib-u jihataynta (NDRC)

Barnaamijka abaabul-ka-saarku wuxuu u adeegga;

1. Mujaahidiinta SNM, naafadooda iyo agoomahooda.



2. Ciidamadda Dawladii hore ee reer Somaliland, naafadooda iyo agoomahooda.
3. Maleeshiyada beelaha naafadooda iyo agoomahooda
4. Abaabul-ka-saarka iyo dib ujihayntu waa ikhtiyaari (voluntary)
5. Barnaamijka hub-xeraynta abbaabul-ka-saarka waxa noqonayaa ku caam ahaaneed una siman yihiin, una furan dhamaan ummadda Reer Somaliland.

Qodobka 5AAD

Wada-shaqaynta Hay'addaha caalamiga iyo Hay'adda Abaabul-ka saarka NDRC

1. Hay'addaha Qaramada midoobay iyo waddamada deeqda bixiya iyo hay'addaha kale ee caalamiga ahi, waxay raacayaan oo tix-galinsiinayaan siyaasadda hub ka-dhigista, abbaabul-ka-saarka iyo dib-u jihaynta ee dalka S/Land udegsan, silooga midhodhaliyo deeqda ay bixiyaan loogana fogaado khilaaf iyo is-maan-dhaaf
2. Haddii loo baahdo in NGOyada waddaniga ahi fuliyaan hawlo laxidhiidha hubkadhigista, Abbaabul-ka-saarka iyo dib-u jihaynta waxa oggolanaya oo xulanaya, isla markaana heshiis la galaya hay'adda abbaabul ka saarka Qaranka (NDRC)
3. Waxyaabaha lagu jihaynayo (Re-integrating components) muwaadiniinta mashruuca ka faa'iidayanaya waxaa sahaminaya oo diyaarinaya hay'adda abaabul-ka-saarka NDRC.

Qodobka 6AAD

Wada-shaqaynta Hay'adda NDRC iyo Hay'addaha Dawliga ah

1. Hay'adda Abaabul-ka-saarku- (N.D.R.C) waxay wada shaqeyn iyo xidhiidh joogta ah la yeelanaysaa Hay'addaha dawliga ah iyo kuwa wadaniga ah ee uu khuseeyo barnaamijka hub ka-dhigistu, abaabul-ka-saarka, jihaynta iyo dib-u-haybaynta qaybta nabadgelyadu.
2. Hay'adda abaabul-ka-saarku- (N.D.R.C) waxa kale oo ay wada shaqeyn la leedahay Madaxweyne ku-xigeenka JSL iyo Guddi wasiirro (Board of Ministers), kana kooban;
 - Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta
 - Wasaaradda Gaashaandhiga,
 - Wasaaradda arrimaha Gudaha
 - Wasaaradda Caddaalada iyo Garsoorka
 - Wasaaradda Maaliyadda
 - Wasaaradda Beeraha
 - Wasaaradda Kalluumeysiga,
 - Wasaaradda Arrimaha Bulshada iyo Shaqada
3. Guddiga Wasiirada ahi (Board of ministers), xilkoodu waa sida hoos ku qoran:
 - Diyaarinta iyo dejinta majaraha siyaasadeed eek u wajahan hawlaha hubka-dhigista.



- Abaabul-ka-saarka
 - Jihaynta iyo dib-u-habaynta qaybta nabadgelyada
4. Guddigu waxay kulmayaan sanadkiiba saddex jeer iyo mararka ay lagama maar-maanka noqoto.
 5. Fadhiyada Guddiga waxa gudoominaya Madaxweyne ku-xigeenka JSL.

Qodobka 7AAD

Qaab-dhismeedka Hay'adda abaabul-ka-saarka iyo Dib-u-jihaynta (NDRC).

1. Qaab-Dhismeedka Hay'adda NDRC waa sida hoos ku xusan: -
 - b) Guddoomiye, oo ah madaxa guud ee Hay'ada
 - t) Agaasime guud, oo ah Madaxa maamulka Hay'ada
 - j) Waaxyo:
 1. Waaxda Maamulka Gaadiidka iyo lacagta
 2. Waaxda Qorshaynta
 3. Waaxda Qiimeynta iyo daba-galka
 4. iyo Wakiil Goboleedyo
2. Guddomiyaha Hay'adda abaabul-ka saarka iyo dib-u jihaynta NDRC waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL.
3. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Abaabul-ka saarka iyo dib-u jihaynta NDRC waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL ka dib marka uu la tashado Guddomiyaha Hay'adda Abaabul-ka saarka iyo dib-u jihaynta NDRC.
4. Waaxyaha Hay'adda iyo wakiilada gobolada iyaga waxa magacaabaya Guddomiyaha Hay'adda Abaabul-ka-saarka Qaranka-NDRC.
5. Guddomiyaha Hay'addu (NDRC) wuxuu saxeexayaa Heshiisyada caalamiga ah eek u wajahan abaabul-ka-saarka iyo dib-u jihaynta.

Qodobka 8AAD

Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkan wuxuu dhaqan-galayaa marka Golayaasha sharci-dejintu (Wakiilada iyo Guurtidu) ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

Alla Mahad Leh

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)

Jamaal Jaamac Xasan

Guddomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Ku-simaha Xoghayana Guud ee G. Wakiiladda Jsl

